



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.bristol.sch.uk

Talaada 17^{da} Jannaayo 2023

Gacaliyayaal Waalidiin iyo Daryeelayaal, Waxaan rajeyneynaa inuu sannadka 2023 uu kuu ahaa mid si wanaagsan kuugu billoowday. Annaga Cabot ahaan si wanaagsan ayuu noogu billoowday. Aad ayey u wanaagsanayd inaan aragno mid walboo idiinka mid ah dhoolla-caddeynaaya iyo dharkii dugsigana xiran.

Waxaa laga yaabaa inaad dugsigu kula kulantay wejjo cusub, waxaa nagu soo saa'iiday arday wax ka barata jaamacadda University of the West of England, oo u imaanaaya aqoon kororsi la xiriiira sida Cabot ardayda wax loo baro. Waxaan ogahay inaad naga caawin doontid in ay ardaydaas si wanaagsan loo soo dhaweeyo.

Waxaan dhawreynaa booqasho ay noogu imaan doonto Thangam Debbonaire oo ah MP deegaanka. Waxay ka hadleysaa dimoqraadiyadda waxayna ka jawaabi doontaa su'aalaha ay ardayda weydiiyaan waqtiga Shirka Guud ee dhammaadka usbuucaan.



Ugu dambeyn, maadaama badankeen ay aad ugu howlan yihiin dhawritaanka wacadka sannadka cusub, waxaan aad ugu dadaaleynaa inaan dhaqan cusub la nimaadno. Waxaan dooneynaa inaan hagaajinno ku imaanshaheenna watigii la rabay. Albaabku wuxuu furmaayaa 8:40 si aad u hesho waqti aad u gaarto fasalkaada marka gambaleelku dhaco 8:45, si aad diyaar u noqoto oo aad maalintaada u billoowdid. Fadlan fasalka gal 8:45.



Haddii aad dareemaysid inaad haayso wax waxtar leh ee lagu qori karo watsidaha soo socda fadlan na ogeysii. Tan waxay ahaan kartaa xaflad soo socota ee deegaanka ka dhaceysa, howlo waxtar leh ee aad isticmaashay iwm. Mahadsanid,

Mrs L-H

Taariikhaha Xusuus-Qorka

24^{ta} Jannaayo – La-dabbaaldega with Excalibur
21^{ka} iyo 22^{da} Maars – La-Tashiga Waalidka/Daryeelaha.

Boorsooyinka Buugaagta

Sida aad ogtahay, dugsigu Cabot ahaan waxaan jecelnahay akhrinta gurigana waxaa ardayda ugu soo dhiibnaa buugaag si aad ula wadaagto carruurtaada. Sida ugu wanaagsan ee buugaagta guriga loo keeni karo ama dugsigu waa in lagu xafidaa boors– tan waxay dhawreysaa buugaagta marar baddanna waa ku raaxeysan karnaa akhrintooda. Boorsooyinka waa kuwo yar oo meel la suri karo si sahal ah iyaga iyo jaakadaha iwm. Waxaad ka iibsan kartaa boorsada xafiiska qiimaha ah £5. Waxaan doorbideynaa boorsooyinka buugaagta intii la isticmaali lahaa boorsooyinka dhabarka.




La-dabbaaldega Excalibur

Waraaqo ayaa la soo diray oo ku saabsan xafladda dhaceysa 24^{ka} Jannaayo. Booqdayaasha ka socda Excalibur iyo Guddiga Akadeemiyaddeenna darteed waxaa xafladda laga dhigay mid tikid lagu galo taasoo ay helaayaan dadka ugu soo horreeya. Haddii aad jeclaan lahayd inaad timaado, fadlan ka hubi xafiiska in ay jiraan tikidho haray.



Fiidiyooyada Akhrinta



Miss Davies waxay sameysay fiidiyooyin yaryar si ay kaaga caawiyaan markaad akhrinta aad la wadaageysid carruurtaada. Hadda waxaa jira fiidiyooyin heerarka 1-8. Miss Davies waxay qorsheyneysaa in ay sameyso fiidiyooyin badan sannadkaan. Waxay soconayaan daqiiqado yare e fadlan daawo.

https://www.youtube.com/playlist?list=PLVJoY_nzF_yeCYaXMA0SbzITaBsn6WnFr

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Rea ee xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630

Cabot's core values are:

Partnership Inclusion Excellence

Macasalaameyn

Waxaan ka xunnahay inaan macasalaameyno Mrs Staley oo ah Maareeyaha Howlaha Dugia – waxay si wanaagsan ugu shaqaysay xafiiska si ay u hubiso in aan lacagteenna si wanaagsan u kharashgareyno! Waaxaa ay tegi doontaa dhammaadka bisha jannaayo, waxaanna u rajeyneynaa mustqbal wanaagsan.

Waan kula socodsiin doonnaa cidda aan u magacaawno jagadaan.